Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 6aad** **FAAFIN SANADLE** **Muqdisho** **2018**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

**Uruurinta Sharciyada iyo Wareegtooyinta ee Jan-December 2018**

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

**BOGGA KOOWAAD**

**SHARCI**

W.M

**BOGGA LABAAD**

XEER

**BOGGA SEDDEXAAD**

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

# SANADKA

# 2018

**XEER RA'IISUL WASAARE LR. 046** Taariikh: 04/10/2018

## Ujeeddo: Go'aan Gole Ansixinta Siyaasadda Istiraatiijiyadda Xasilinta Deegaanada Nugul 2018 - 2020

***Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS***

**Markuu Arkay**: Qodobka 99[aad] , (a), (b), (e) iyo (f) ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay**: Qodobka 100[aad] , (a), iyo (d) ee Dastuurka KMG

**Markuu Arkay**: Soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta.

**Markuu Arkay**: Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.55.10.18** ee **04/10/2018** kuna saabsan ansixinta "**Siyaasadda Istiraatiijiyadda Xasilinta Deegaanada Nugul 2018-2020**" oo uu Goluhu cod buuxda ku ansixiyey.

**Markuu Tixgeliyey**: Baahida loo qabo in la meel mariyo Siyaasadda Istiraatiijiyadda Xasilinta Deegaanada Nugul 2018-2020.

### *Wuxuu Meel-mariyey:*

### Qodobka 1aad

Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.55.10.18** ee 04/10/2018, kuna saabsan ansixinta "**Siyaasadda Istiraatiijiyadda Xasilinta Deegaanada Nugul 2018-2020**" oo uu Goluhu cod buuxda ku ansixiyey.

### Qodobka 2aad

Waxa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta loo igmaday in ay hirgeliso, meel-marisana Siyaasadda Istiraatiijiyadda Xasilinta Deegaanada Nugul 2018-2020.

### Qodobka 3aad

Siyaasadda Istiraatiijiyadda Xasilinta Deegaanada Nugul 2018-2020, waxa ay dhaqan-gelaysaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Mudane Xasan Cali Khayre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: 14AN/30/20
TAARIIKH 6/10/2018
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

# ISTIRAATIIJIYADA XASILINTA DEEGAANADDA NUGUL 2018-2020

**Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka & Dib-U-Heshiisiinta**

Daarta 888, Degmadda Waaberi, Muqdisho, Soomaaliya

# 1. Horudhac

Madaxweyne Maxamed Cabdullaahi Farmaajo ayaa qudbadiisa caleema-saarka ee February 22, 2017, ku sheegay in ay jiraan caqabado amni oo u baahan in wax laga qabto, wuxuuna balan qaaday “sareynta sharciga, xoojinta cadaalada, ciribtirka saboolnimada iyo soo celinta kalsoonida shacabka ee dowladda”. Madaxweynaha wuxuu bogaadiyay waxqabadka beesha caalamka, gaar ahaan Midowga Africa (AMISOM) gacantii ay ka geysteen xasilinta Soomaaliya ayaga oo kaabaya ciidanka xooga dalka. Iyadoo la tixraacayo qorshaha Xukuumadda ee Nabad iyo Nolol, dibu-habeynta Istaraatiijiyada Xasilintu waxay xooga saareysaa sidii loo soo celin lahaa adeega bulshada, gaarsiinta maamul dowladeed iyo laxisaabtan iyadoo la midaynayo dadaalka beesha caalamka, sida Qaramada Midoobay, AMISOM iyo Daneeya’yaasha Barnaamijyada xasilinta, oo ka hoos shaqeynaya hogaanka iyo awaamirta Dowladda. Istaraatiijiyada Xasilinta waxaa la socon doona qorshe xasilineed oo heer dowlad-goboleed ah, kaas oo si hoose u eegi doona baahiyada iyo caqabadaha soo foodsaara dowlad goboleedyada, sida Jubaland, Koonfur Galbeed, Hirshabeelle, Galmudug iyo Maamulka Gobolka Benaadir.

Istaraatiijiya xasilintu waxay la falgalysaa qorshaha kalaguurka ee amniga (transion plan) kaas oo xooga saaraya in hay’adaha amniga ee dowladu hantaan lana wareegaan amaanka dalka.
Waxaa xusid mudan in dadaalada xasilintu ay qeyb weyn ka yihiin Qorshaha kala guurka oo haatan wajigiisii kowaad la hirgalinyo.

Istaraatiijiyadan ma’ahan mid hada la unkayo ee waxa ay qeyb ka tahay tii hore u jirtay, iyadoo xoojineysa mabaa’diida iyo waxa laga baran karo isbadalkii dhacay iyo caqabadihii lasoo maray, si loo helo qorshe iyo hanaan loo dhan yahay oo isku jaan go’an, kaas oo xooga saari doona arrimaha soo socda:

• Kor-uqaadida hogaanka rayidka, lahaanshaha iyo kormeerka howlaha horumarinta siyaasadda oo loo marayo dhismaha maamuladda xubnaha ka ah dowladda Federaalka iyo horumarinta qorshaha heer maamul goboleed iyo dibu-eegis lagu sameeyo hanaanka isku-dubaridka howlaha.

- In wax laga barto waaya-aragnimadii hore ee howlaha xasilinta, tusaale ahaan, in la xoojiyo xiriirka u dhexeeyada howlaha dibu-heshiisiinta bulshada iyo kuwa la xiriira sarayenta sharciga, soo

ceelinta adeega bulshada iyo maamul dhisida, iyada oo niyada lagu hayo doorka amniga ee howlaha xasilinta.

- In la darso lana ogaado goobaha iyo degmoooyinka ay howlaha xasilintu ka socdaan ee nugul, si looga caawiyo xasilinta, loona xaqiijiyo bixinta adeeg dheelitiran oo wax ka qabta goobaha dhawaan dowlada gacanteeda ku soo laabtay ee nugul ama aan helin adeeg ku filan.

Sidaas darteed, istaraatiijiyadan waxa ay ka turjumeysaa go'aamadii dowladda iyo beesha caalamka ee ku aadanaa arrimaha "Iskaashiga Cusub Soomaaliya ee Nabadda, Xasilinta iyo Horumarinta" taas oo lagu ansixiyay Shirkii London ee bishii May 2017.

Shirkan waxaa la isla qiray horumarkii ay dowladdu ku tilaabsatay laga soo bilaabo xiligii dajinta barnaamijka Xasilinta iyo dadaalka ay ka geysatay Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka ee lagu hirgalinayay Heshiiskii Hiigsiga cusbaa (Somali Compact) ee 2013.

Wixii ka danbeeyay xiligaas, waxaa yimid isbedello iyo horumar dhanka siyaasada ah, oo ay ka mid yihiin dhismaha dowlad goboleedyada iyo dhameystirka hanaankii federaaleynta ee dalka.
Isbadaladaas waxay ahaayeen kuwa nugul, oo marmarka qaar suurowda in burbur ku yimaado, gaar ahaan marka la eego qaska iyo amni-darada ay horkacayso kooxda argagixisada ee Al Shabaab.

Sidoo kale, mashaariic dhowr ah ayaa jiray oo qorshe joogta ah aan laheyn, ama aan ku xirneyn howlihii socday ee xasilinta. Dibu-eegis kadib, Istaraatiijiyadu waxay xooga saareysaa sidii wax looga baran lahaa caqabadihiii iyo casharadii laga bartay hirgelinta xasilinta. Sidaa darteed, waa lama huraan in kor loo qaado tayada iyo xirfada hay'adaha hormoodka ka ah isku-dubaridka iyo dadaalka xasilinta, horumarinta, sameynta iyo fulinta siyaasadda si wadajir leh oo ay qeyb ka tahay istaraatiijiyada amniga iyo horumarinta.

## 2. Qiimeynta Nuglaanshaha

Wadatashigii arrimaha dibu-heshiisiinta oo ay martigelisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka ee June 2017 wuxuu tilmaamay taariikh ahaan dhibaatada jirtay, isbadalkii lasoo maray iyo dabcan waxyaabaha kalifayay nuglaanshaha uu dalka ku jiro. Caqabadahaas waxaa ka mid ah in la maareyn waayo sidii loo sameyn lahaa nidaam

isku dheelitiraya dhaqanka Soomaalida iyo mabaa'diida guud ee diinta si loo helo dowlad casri ah, iyo sidoo kale in la qeexo jiritaanka dhibaatada asalkeeda, tusaale ahaan, kooxeysiga, qeybsiga kheyraadka, sinnaan la'aanta iyo heyb-sooca dadka laga badan yahay iyo dumarka[1]. Caqabadahaas siyaasiga waxaa mar walba dabasocday musiibooyin dabiici ah oo soo laablaabanayay.

Si kastaba ha ahaatee, Soomaaliya waxa ay ku tilaabsatay horumar la taaban karo oo dhinacyo badan quseeya laga soo bilaabo 2012-kii, dhowr ka mid ah isbadalkaasna waxay gundhig u yihiin taageerada Istaraatiijiyada Xasilinta. Waxaa ka mid ah sameyntii afar maamul goboleed, soo celintii goobihii Shabaabku qabsaday, maalgashi baaxad leh oo lagu sameeyay mashaariicda bulshada iyo dhismaha maamullo degmo, iyo xil-iskasaaridii wadajirka aheyd ee Dowladda Soomaaliya iyo Beesha Caalamka ee ahayd in Amniga Si Guud Loo Wajaho taas oo la filayo in ay hagto geedisocodka qariirada guud ee amniga dalka[2].

Hadaba, mushtamaca Soomaaliyeed iyo maamulada dowliga ah oo ay wehliyaan xoogaga AMISOM, waxaa si joogta usoo foodsaara dhibaatooyinka amniga ee Al Shabaab oo haatan u xuubsiibtay in ay baadiyaha ka soo jabhadeeyaan, inkasta oo hadana ay weeraro argagixiso ka fuliyaan magaalooyinka waaweyn ee dalka. Inkasta oo ay doonayaan in dowladda ay kula tartarmaan shacabka, hadana waxaa soo baxaysa in argagixisadu ay mar walba shacabka xoog iyo cabsi-galin ku maquuniiyaan maadaama aysan bixin karin adeeg bulsho oo dabooli kara baahiyada jira. Taas badalkeeda, waxay shacabka ka hortaagan yihiin dowladooda; dowladiina waxay ka hortaagan yihiin adeeg bixinta shacabka, dhamaantoodna waxa ay u sahleen in ay majo xaabiyaan dadaalkii loogu jiray xasilinta dalka.

---

1 Macluumaad dheeri ah waxaad ka heli kartaa warbixintii laga diyaariye shirkii dib u heshiisiinta ee hanaanka qaran oo lagu qariiradeeyey nabada iyo khilaafaadka dalka oo ay soo qaban qaabisay Wasaarada Arimaha Gudaha iyo Federaalka. Bishii Juun 2017

2 Qorshaha kalaguurka amniga gaar ahaan qeybta hanaanka amniga ee CAS 1&2 kaas oo xooga saaraya si ay ciidamada soomaalidu u hanan lahaayeen amniga dalka.

In la gaarsiiyo shacabka maamulka dowladdeed waxa shardi u ah saddex arrimood – joogis, karti waxqabad iyo in maamulka laga hibeysto. Si sare loogu qaado kalsoonida loo hayo dowladda, waa in qorshaha xasilinta uu taageeero iyadoo la sare marinayo xirfada iyo kartida maamulka, jiritaanka dowladda heer federaal iyo mid maamul goboleed, kasbashada kalsoonida shacabka iyo sareynsiinta sharciga iyo kaladanbeynta. Saddexdaas arrimood waa isku xiran yihiin, oo midba ka kale ayuu la fan-galayaa. Sida ay u kala duwan yihiin karti iyo dhaqaale ahaan, ayaa maamul goboleed walba waxa uu u baahan yahay taageero u qalanta caqabadaha iyo fursadaha soo foodsaaraya. Xitaa marka la eego maamullada dhexdooda, waxaad moodaa mashaariicda horumarinta ay ku siman yihiin caasimadaha, oo degmooyinka aysan wax badan ka socon. Taas ayaa sababaysa in la balaariyo mashaariicda si loo helo waxqabad baahsan.

Dowladda Hoose waa Meesha ugu horeysa oo ay iskaga xiran yihiin muwaadanka iyo dowladda. Mid ka mid ah casharada aan ka baran karno Istaraatiijiyadii hore ayaa ah in shacabka ay aad ugu baahan yihiin cadaalad goobaha xasilinta, taas oo noqonaysa in sharciyada dib loogu laabto. In dadku ay helaan cadaalad waxa ay ka muhiimsan tahay wax walba marka la doonayo in la dhiso nabad iyo amni waara. Sidoo kale, goobaha aysan wali cadaaladda iyo ciidanka amnigu gaarin waa degmooyinka ka baxsan caasimadaha maamul goboleedyada.

Goobaha ka baxsan magaalooyinka waa weyn iyo caasimadda Muqdisho qiimeyn lagu sameeyey, gaar ahaan dhaqdhaqaaqa iyo horumarinta dhaqaalaha, ayaa waxaa lagu ogaaday in ay ku xiran yihiin axsoosaarka beeraha. Taas waxay cadeyneysaa in mashaariicda loo baahan yahay ay noqdaan kuwa abuuri kara fursado nololeed iyo waxsoosaar dhaqaale si bulshadu ay uga baxaan saboolnimada iyo faqriga mudada dheer halakeeyey. Colaadaha iyo iskudhaca bulshada ama qabaa'ilka Soomaalida iyana waxa ay qeyb ka yihiin culeyska saaran bulshada. Waxa ay u baahan tahay dibu-heshiisiin taabagal ah oo ka-falcelin u noqota culeyskaas, kana bilaabaneysa heerka ugu hooseeya ee bulshada, maadaama ay xaqiijineyso in hay'adaha dawladda ay maareeyaan si ay qeyb uga noqdaan dadaalka dibu-soocelinta dawladnimada iyo nabadeynta. Wajigani wuxuu horudhac u yahay in la daboolo baahida loo qabo dawlad leh awood dhexdhexaadnimo marka uu yimaado iska-hor-imaad hubeysan bulshada dhexdeeda, isla markaana u fududeyn kara bulshada in ay iyaga dhexdooda is nabadeeyaan.

Inkastoo mashaariicda xasilintu ay door humiim ah ka qaataan xal u helida asalka ee dhibaatooyinka nuglaanshaha, hadana waxaa jirta in aysan wax walba dawo u aheyn, oo loo baahan yahay in waxyaabo kale lala yimaado, sida dhismaha guddiga degmada, dhaqaalihii iyo fulinta hawlaha addeega aasaasiga bulshada. Hadaba, waa lama huraan in dawladgoboleedyada oo kaalma ka helaya dawladda dhexe, ay bilaabaan istaraatiijiyadii lagu mideyn lahaa ama la iskugu xiri lahaa barnaamijka xasilinta si gunta looga daweeyo dhibaatooyinka nuglaanta iyo xasilooni darada.

## 3. Hadafka Guud

Hadafka guud ee laga leeyahay istaraatiijiyadan waa iyada oo laga miradhaliyo dadaalka xasilinta, bulshadana lagu xoojiyo isku-duubnaan dhexdooda ah iyo mid dawladooda ah. Iyada oo la cuskanayo faaqidaada aan kor ku sheegnay, ujeeddada istaraatiijiyadan waxay tahay in la taageero nabadda iyo dhismaha nidaamka dawliga, loogana hortago dhibaatooyinka keeni kara iskudhaca iyadoo la sameynayo sidata /n:

- In lala sameeyo bulshada wadahadal si looga caawiyo qaabkii ay ku xalin lahaayeen waxyaabaha dhabta ah oo ay kala tirsanayaan, loona dhiso kalsooni buuxda.
- In la ballaariyo fursadaha dhaqan-dhaqaale si loo abuuro isku filnaansho, loona yareeyo saboolnimada, lana kordhiyo fursadaha keeni kara nolol-maalmeedka.
- In kor loo qaado daahfurnaanshaha iyo kamid-noqoshada bulshada rayidka si ay uga qeyb qaataan dhismaha dawladda, gaar ahaan heer gobol iyo mid degmo, loona gaaro nidaam loo dhan yahay.
- In la taabageliyo hawlaha amniga iyo cadaaladda si loo ballaariyo dawladda, dadkuna uga hibeystaan.

Guud ahaan, tilaabooyinkaas waxay meesha ka saarayaan colaadaha iyo qolyaha ka faa'iideysta, gaar ahaan Al Shabaab, waxaana badalkooda galaya dawladnimo loo dhan yahay iyo daahfuran dadku ay la xisaabtami karaan. Tusaale ahaan, sameynta hanaan dibu-heshiisiineed oo waxtar leh iyo nidaam dawladeed wuxuu muhiim u yahay in khilaafka, addeeg bulshada iyo dawladnimada ay noqdaan kuwa la maareyn karo si loo gaaro hadafka dhisma-dawladeed iyo nabadeyn ballaaran.

**Arrimaha Ahmiyada Leh**

In hadafka kor ku xusan la gaaro waxaa laf-dhabar u ah in la dardargeliyo go'aanka ah in wax laga qabto afar-arrimood oo isku xiran:

*i.) Soo kabsashada bulshada*
*ii.) Dib-u-heshiisiin bulsho*
*iii.) Maamul maxali ah, iyo*
*iv.) Sareynta sharciga*

Arrimahaas isku xiran ayaa sabab u noqon kara in xal loo helo nuglaanshaha iyo waaxyaabaha sababa colaadaha ee u baahan in laga hortago si loo dhiso heykal dawladeed oo suuragaliya nabadeyn iyo nidaam federaali ah oo dhameystiran. Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dibu-heshiisiinta doorkeeda ku aaddan hirgelinta qorshe xasilooni oo buuxa waxa uu salka ku haya in ahmiyad weliba ay leedahay qorshe u gooni ah iyo istaraatiijiyad taas oo ay caawinayaan hay'adaha qaabilsan ee dawliga ah iyo kuwa amniga ka kaalmeeya dawladda, sida AMISOM. Si gaar ah, Qorshaha Guud ee Amniga, qabyoqoraalkiisa saddexaad, iyo qeybaha xiriirka la leh ee amniga sida Qorshaha kalaguurka waa tixraac muhiim ah, sida uu qeexayo Sanduuqa Horumarinta iyo Dibudhiska Soomaaliya, oo leh qorshe siyaasadeed iyo mid ah sareynta sharciga.

In xal loo helo meelaha ay iskaga murugsan yihiin amniga iyo horumarinta ayaa ah kuwa ay garwaaqsadeen dhamaan inta dan-wadaagta ah – oo macnaheedu yahay ma jiri karo amni waara oo aan laheyn horumar, sidoo kale, ma jiri karo horumar aan laheyn amni. Sidaas darteed ayay muhiim u tahay in la xaqiijiyo dadka dan-wadaagta ah in ay ka xaajoodaan hanaankii ay ku dajin lahaayeen istaraatiijiyad xasilooni oo la jaanqaadi karta doodaha siyaasadeed ee jira. Taas badalkeedu waxay noqoneysaa in mashaariicdu ay hagaan siyaasadda salka ku heysa istaraatiijiyada xasilinta, oo xaliya caqabadaha sida ay u kala horeeyaan oo nidaamsan, tusaale ahaan, leh qorshe iyo qiimeyn ku xiran maamulgoboleedka booliskiisa, ciidanka qalabka-sida howlgalkooda iyo diyaar-garowgiisa iyo inta la qorsheeyay ee laga dhimi lahaa ciidanka AMISOM. WAGFD oo kaashaneysa dhigeeda maamul-goboleedyada ayaa horumuud ka noqoneysa madasha wadajirka ah ee lagu maamulayo taageerada dawladaha hoose[3] taas oo gacan ka geysan doonta arrimo badan oo qeyb ka ah barnaamijka istaraatiijiyada xasilinta. Si kastaba ha ahaatee, istaraatiijiyada xasilinta ayaa ah madal guud oo ay qeyb ka yihiin Wasaarado dhowr ah, gaar ahaan Wasaaradda Cadaaladda iyo Wasaaradda Amniga Gudaha marka loo eego arrimaha sareynta sharciga oo qeyb ka ah qorshaha xasilinta.

## Mabaa'diida Hagaya

Iyada oo ay horumuud ka tahay Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dibuheshiisiinta, oo si hoose ula shaqeyneysa wasaaraddaha dhigeeda ah ee maamulgoboleedyada, sida Jubaland, Koonfur Galbeed, Hirshabeelle, Galmudug iyo Maamulka Gobolka Benaadir, iyo qeybo ka mid ah Dawladda Federaalka oo latashiyo badan kala yeelatay arrimaha xasilinta, ayaa waxay dibu-eegis ku sameysay istaraatiijiyada iyadoo laga eegayo dhinacyada soo socda:

Marka ugu horeysa, qorshaha xasilinta ee Soomaaliya ayaa ah hanaan siyaasadeed oo xasaasi ah, sidaas darteedna loo baahan yahay taxadar dheeraad ah oo ku aaddan isbadalka xaaladaha siyaasadeed. Sidoo kale, howlaha xasilinta waa in loo arkaa kuwa nugul, aad iskugu qasan oo aan la isku haleyn karin, wixii la galiyanna ay noqon karaan hal-bacaad lagu lisay.

In dib loo yagleelo oo la xoojiyo hay'adaha dowliga heerarkooda kala duwan waa hawl qaadaneysa jiilal, una baahan in waxqabadka barnaamijka xasilinta ee lagu xoojinayo hay'adaha dawladda mar walba qeyb ka noqdo, xiliga la joogo iyo mustaqbalka fog.
Maadaama uu barnaamijka xasilinta uu saameyn degdeg ah yeelan karo, hadana waxaa loo baahan yahay in mar walba qorshaha lagu daro sidii kor loogu qaadi lahaa tayada iyo kartida hay'adaha dowliga ah. Inkasta oo xal-u-helida amni-darada iyo hawlaha la xiriira ee hawlgalada ciidamada ay tahay arrin muhiim u ah istaraatiijiyada, hadana hawlgalada noocaas ah waxaa loo arkaa oo kaliya in ay qeyb ka yihiin dadaalada balaaran ee socda si loo maareeyo nuglaanshaha iyo dibu-sookabashada bulshada oo asal u ah dhismaha nabadda iyo qorshaha horumarinta dawladnimada.

Goobaha xooga la saarayo; markii istaraatiijiyada dibu-eegis lagu sameeyay waxay diirada saareysaa goobaha aan kor ku sheegay ee afarta ah ee ka tirsan Maamul Goboleedyada Cusub[4] iyo maamulka Gobolka Benaadir. Dhanka kale, maamulka Puntland waxa ay qeyb ka yihiin mabaa'diida iyo iskuxirka la doonayo ee istaraatiijiyada xasilinta ee u

---

[3] 5 qeybood oo barnaamijka wadajir oo kala ah (a) Dib- u heshiisiinta bulshada, (b) Mashaariicda bulshada, (c) Wadahadlka bulshada(d) Dowladdaha hoosel(e) Istraatiijiyada isgaarsiinta.

[4] Istraatiijiyadii hore waxa ay diirada saaraysay 25 degmo oo ay dowaladu dib ula wareegtay,

Degsan maamulka, hadba sida ay u arkaan in loo fulin karo ama loogu baahan yahay[5]. Horumarinta xadidan ee gobolada waxaa loogu tala galay in lagu hirgaliyo mashaariicda degmooyinka kuwaas oo afarta arrimoood ee qorshaha xasilintu eegayo, waxayna si gaar ah xoogga u saari doontaa meelmarinta mashaariicda degmooyinka iyadoo laga ambaqaadayo qorshaha maamul-goboleedka.

Dawladda dhexe iyo kuwa maamul goboleedyada waxa ay u baahan yihiin wadashaqeyn xoogan ooo dhanka isku-dubaridka ah iyo hanaankii loo mari lahaa si wax looga guulgaaro hadafka xasilinta ee gobolada oo idil, loona helo iskaashi si hay'addaha caalamiga ah ay wax ugu kordhiyaan horumarka socda.

## 4. Goobaha Bartilmaameedka ah

Guud ahaan, goobaha bartilmaameedka ah waa in kor loo qaado ballaarinta awooda maamulka, kartida, iyo in maamulka laga hibeysto iyada oo la taageerayo addeega ay dawladdu horseedka ka tahay, iskuxirnaanta bulshada iyo dibu-heshiisiinta, kuwaas oo ah yoolalka ay hiigsanayaan maamul goboleedyada. Afarta tiir ee hoos ku xusan waxa ay ka dabqaadanayaan waxqabadkii istaraatiijiyadii xukuumaddii hore, laakiin waxaa ku jira qodob cusub oo tilmaamaya isdhexgalka bulshada iyo in la xaqiijiyo in maamuladda rayidka ay hogaamiyaan dadaalka amniga iyo cadaaladda oo la'aantood aysan suuragal aheyn in ay sii socdaan guulihii la gaaray. Sidoo kale afarta tiir waxaa la jira in istaraatiijiyada xasilintu ay door ku leedahay isku-xirka arrimaha isi-saameynaya oo ay wadaan hay'adaha kale ee dawliga ah iyo siyaasadaha hogaaminaya, sida qorshaha Ka-hortaga / Iskacaabinta Fowdada Xagjirka (Eeg qeybta 5-aad).

Dhanka maamul-goboleedyada, goobaha wadajirka loo abaarayo waxa ay yeelan doonaan qorshe u gaar ah oo xasilineed, kaas oo salka ku haya fahamka dadka deegaanka iyo arrimaha sababa nuglaanshaha. Qorsheyaashan heerka gobol waxa ay saldhig u yihiin hawlaha socda ee iskudubaridka, kuwaas oo gacan ka geysan doona ahmiyadaha iyo tilaabooyinka la qaadayo sida ay u kala horeeyaan, hadeey noqon laheyd dhanka mashaariicda ama howlaha caadiga ah. Waxaa intaas weheliya tixgelinta la siinayo mashaariicda mustaqbalka fog ee degmooyinka ku jira soo-kabashada.

---

[5] Waxaa la isku raacay hanaanka wadajir in khibradaha iyo horumarka laga gaaray ee xaga dowladaha hoose gaar ahaan Putland loo ga faaiideeyo dowlad goboleedyada kale ee curdunka ah. Dowlad goboleedyada dhexdoodana ay iisku gudbiyaan xogta iyo khibraaha ay ka dhaxlayaan mashaariicda xasilinta si ay ukala faa'iideystaan

Goobaha dhawaan Shabaab laga xoreeyay, ama dibu-heshiisiintu ka dhacday iyagana waxaa xoogga la saarayaa sidii loo dedejin lahaa balaarinta awoodda maamulka, oo loo marayo mashaariicda bulshadu rabto iyo sameynta maamul ku-meel-gaar ah kuwaas oo aassaas u noqda mashaariic horumarineed oo dheeraad ah. Sidoo kale, waxaa jira meela kele oo ay nuglaanshuhu ka jireen oo wax badan laga qabtay taas oo sahashay in mashaariic horumarineed iyo maalgashi laga saameeyo si loo taageero isku-filnaanshaha bulshada iyo yareynta saboolnimada. Qorshaha maamul-goboleedka waa in uu la socdaa istaraatiijiyad mas'uul ka ah iskukeenista arrimahaas oo idil.

## Bartilmaameedka i) Soo-kabsashada Bulshada

Marka aad eegtid wajigii koowaad ee Istaraatiijiyada Xasilinta ee WAGF oo bilaabatay 2013 kii, waxqabadkii ugu weynaa ee lagu taageerayay istaraatiijiyada waxaa lagu soo koobi karaa in uu ahaa mashaariicda soo-kabashada bulshada. Deeq-bixiyeyaasha, sida SSF, USAID, mashaariicda ay maalgeliso dawladda Norway oo ay dhameystiraan hay'addaha caalamiga sida TIS+, SSI/Dalbile, Nordic International Support (NIS), CPD, iyo kuwa kale oo la mid ah, waxay gacan ka geysteen taageerada bulshada iyo maamulada kusime-yaasha ah ee loo dishay degmooyinka. Hawlahaas waxaa ka mid ahaa dibu-dhis, ama dayactirka goobihii dawladda, sida xafiisyada, xarumaha bulshada, garoomadda kubadda, ceelasha, nalalka cadeeda ku shaqeeya ee wadooyinka ifiya, iyo dayactirka wadooyinka. Inkasta oo waxqabadkaas uu aassaasi u yahay soo-kabsashada bulshada, hadana qaar ka mid ah waxay xoojiyeen sareynta sharciga, waxaana ka mid ah ileyska wadooyinka oo gacan ka geystay amniga, dayactirka maxkamadaha (NIS waxa ay ka hirgelisay degmooyinka Waajid iyo Bakool) oo dhamaantood wax fiican ka badalay garsoorka.

Marka la eego baahiyada ay qabaan maamul-goboleedyada dhawaan la yagleelay, sookabsashada bulshada waxay leedahay ahmiyad gaar ah, dibu-eegista istaraatiijiyadda cusubna waa ay sii wadi doontaa. Waxay arrintan cadeyn u tahay soo-kabsashada horumarka leh ee laga hirgaliyay degmooyinka, oo lahaansho dawladeed lagu dhameystiray, taas oo abuurtay karti dhanka waxqabadka (heer degmo iyo mid gobol) iyo bulshadii oo ka hibeysatay maamulka. Qeybtan waxa ay xiriir la leedahay qodobka 2-aad ee Qorshaha Wadajir: oo ah hawlaha/mashaariicda nabadeynta, hadafkeeduna yahay "in la dhiso kartida maamullada iyadoo la siinayo waaya-aragnimo ku saleysan

dhaqanka dimuqraadiyada, oo la bixinayo adeegga aassaasiga iyo kaabeyaal dhaqaale oo bulshadu qeyb ka tahay."

Dawladdu waxa ay garowsan tahay in mashruuc walba iyo hay'adaha fulinayaa ay isticmaalaan habab iyo nidaam u gaar ah marka ay la shaqeynayaan maamullada maxaliga ah iyo bulshada, taas oo ay u madaxbanaan yihiin, ama uusan jirin sharci u diidaya sidaas. Si kastaba ha ahaatee, dibu-eegista Istaraatiijiyada Xasilinta waxa ay soo jeedineysaa in toos loola shaqeeyo Guddiga Nabadda iyo Xasilinta Degmadda meelaha ay ka jiraan, ama la adeegsado raadraaca USAID TIS+ ee la-shaqeynta bulshada tixraac ahaan marka la doonayo in hawl loo fuliyo. Hawlahaas oo idil, maamulka degmadda iyo kan dawlad goboleedka waa in ay si hoose ula shaqeeyaan, kana qeyb galiyaan arrimaha iyo mashaariicda soo-kabsashada bulshada.

## Bartilmaameedka (II) Dib-u-heshiisiin Bulsho

Dhamaan jaaliyadaha soomalidu waxay si joogta ah xooga u saaraan muhiimada ay leedahay dib uheshiiisiintu waana mid ka mida qorshayaasha xukuumada 'Nabad Iyo Nolol". Arinkaasu wuxuu horseeday in Wasaaradda Arimaha Gudaha, Federaalka iyo Dibu-heshiisiintu ay qabato shir wadatashi mudadii u dhexeysey (13-17 June 2017) shirkaas oo looga arinsanaayey sidii loo ogaan lahaa heerka ay gaarsiinsan yihiin xaaladaha colaadaha iyo nabadeed ee dalka.

Wadatsahigaas waxaa diirada lagu saaray baahida looqabo in xooga lasaaro sadex qaybood oo dib-u-heshiisiineed oo kala ah:

1) Dib-u-heshiisiin siyaasadeed,
2) Dib-u-heshiisiin bulsho, iyo
3) Dib-u-heshiisiin caqiido.

Lakiin staraatiijiyada xasintu waxay diirada saaraysaa qodobka 2aad oo ah dib-uheshiisiinta bulsho inakstoo aysan ka marnayn wax kaqabshada ismaandhaafka ku salaysan kala aragti duwanaanshaha fahamka diinta iyadoo loomarayo istraatiijiyada kahortaga xagjirnimada.

Inkasta oo ay colaadda Soomaaliya tahay mid wejiyo badan leh, hadana waa colaad maxaliya. Colaadahaas maxaliga ahi waa kuwa ay badanaa ururka Al-Shabaab uga faa'iidaystaan sidii ay ku xagal-daacin lahaayeen dhismaha dariiqa nabada. Sidaa daraadeed, istaraatiijiyada xasalintu waxay diirada saaraysaa dib-u-heshiisiin lala samaynayo jaaliyadaha

halka dib-u-heshiisiinta siyaasadeed loo mari doono dariiq iyo istaraatiijiyado kale. Lakiin arrimaha sida gaarka ah ula xiriira Hanaanka Wadajir waxaa lagu soo koobay kuwa soo socda:

- In la xoojiyo awooda dowlad goboleedyada iyo arimaha gacanta ka geysankara sharciyadooda sida dhismaha Goloyaasha deegaanka. Sida daraadeed waxaa laga maarmaana in la abaaro jaaliyadaha heer deegaan hoosna laga soo bilaabo wadatashiyada dhismaha golayaasha deegaanka.

- In dib-u-heshiisiin bulsho loo sameeyo jaaliyadaha ay xurgufta colaadeed oo soojireenka ahi ka dhexeyso sida dagaalada ay sababaan baadka iyo biyuhu.

- In xal looraadiyo sidii hoos loogu dhigi lahaa colaadaha taagan oo u dhexeeya jaaliyadaha isku degaanka, ah gaar ahaan kuwa dhexmara maleyshiyo beeleedyada.

Xasilintu waxa ay la xiriirtaa in lahelo wada xaajoodyo badan oo isugu jira kuwa jaaliyada gudaheeda ah iyo kuwa ka baxsanba si loo horamariyo isdhexgalka bulshada iyadoo la raacayo sadexdeeda arimood ee aan kor kusoo sheegnay. Tusaale ahaan waxaa laysku xirikaraa howlaha laqabanayo si loo xoojiyo cadaaladda iyo hay'adaha dowladda si loo xaliyo ismarinwaaga bulshada dhexdeeda ka jira. Waxaa kaloo muhiim ah in gacan wax ku ool ah laysla garab taago bulshada rayidka ah si loo yagleelo hay'ado dolwadeed oo sharciyad leh isla xisbaatan iyo daah furaana kajirto loona helo nidaam loo dhanyahay laguna wada qanacsan yahay.

## Bartilmaameedka (III) Maamulka Dowladaha Hoose

Tiirka afraad ee hanaanka wadjir wuxuu tilmaamaya Maamulka dowladaha hoose oo isugu jira dhismaha Golayaasha deegaanka iyo kor u qaadida tayadooda. Hirgelinta dadaaladaas waxaa laga filayaa inay xoogga saaraan sadex arimood oo kala ah: Maamul daadejin, Baahinta siyaasadda iyo daadejinta maaliyada.

Tayeynta maamulada degmooyinka dhowaan la yagleelay waxaa diirada lagu sarayaa tababaro lasiinayo maamulka degmada iyo jaaliyadda ama shacabka degmadaas. Tabaradaasi waxa ay isugu jiri doonaan doorka iyo waajibaadka maamulka iyo shaqaalaha, qaabdhismeedka maamulka iyo adeeg bixinta.

Waxaa sidoo kale laga tayeynayaa arimha la xiriira qorshaynta, miisaaniyad dejinta, daahfuraanta, isla xisaabtanka, dakhli ururinta iyo qaabka loo maareeyo dakhliga.

Dowlad goboleedyada Jubaland iyo Koonfur galbeed waxay daah-fureen dhismaha goleyaasha degaanka kadib markii ay ansixiyeen sharcigii Dowladaha Hoose. Waxaase u baahan in gacan laga siiyo samaynata sharciga Dowladaha hoose Dowlad goboleedyada Galmudug iyo Hir - Shabeele si dhismaha goleyaasha degaanku u noqdo mid ku yimi qaab sharciya.

Istraatiijiyadda xasilintu waxay si weyn u qadarinaysaa doorka ay ka qaataan barnaamijka Dowladaha hoose mashaariicda kala ah UN/JPLG, FCA/CRD oo ay maalgeliso EU iyo SSF oo qorshaynaysa inay gacan ka siiso Dowlad goboleedyada dhismaha goleyaasha

deegaanka. Dowlad gobeleed kastaa waxa uu diyaariyey ahmiyada iyo qorshaha dhismaha goloyaasha deeganka oo ah qaab ay kula horaynayaan dhismaha maamulka degmooyinku.

## Bartilmaameedka (IV) Saraynta Sharciga

Barnaamijka saraynta sharcigu wuxuu ahaa mid meesha ka maqan marka lafiiriyo Istaraatiijiyadii xasilinta ee (2013-2017) taasoo xooga saareysey dib u soo kabashada bulshada, dib-u-heshiisiin iyo maamulka Dowladaha Hoose. Khibrada laga dhaxlay istaatiijiyadaas hore waxay tahay hadii aanu jirin amni bulsho oo hareer socda howlgalada ciidamada, horumarkasta oo laga gaaraa faafinta awoodda dolwadu wuxuu noqonayaa mid aan dhamaystirayn oo nugul.

Waxaa suurta gal ah inay kasoo ifbaxaan goobaha ay dolwadu gacnata ku dhigto isku dhacyo u dhexeeya beelaha ama shakhsiyaad oo la xiriira xurguf hore.

Sidaa daraadeed doorka iyo muhiimada ay leeyihiin hogaamiye dhaqameedku oo ku aadan maaraynta ismaandhaafyadu waa in xalka ay keenaan lagu xoojiyaa nidaam amni oo sharciya iyo hay'ado garsoor si loo joogteeyo saraynta sharciga iyo wadajirka bulshada.

Dib-u-eegista istaraajiyada xasilintu waxay qiraysaa talaabooyinka yididiilada leh ee la qaaday waxaana taas mahadeeda leh ilaahay ka sokow saaxiibada qaybta ka ah ku-dhaqanka sharciga ee caalimiga ah

kuwaas oo fududeeyey tababarro loo fidiyey shaqaalaha garsoorka, maxkamadaha guurguura si kor loogu qaado cadaalada, ka qaybqaadashada sugida amniga ee bulshada iyo tababarka ciidmada booliska oo loo sameeyey qaar kamid ah Dowlad goboleedyada. Laakiin iskudaydaasi waxay ka qabsoomeen Kismayo iyo Baydhabo oo keliya oo ah caasimadaha Dolwada goboleedyada ee Jubaland iyo Koonfur galbeed waxaana hada kasocda Beledweyn iyo Jowhar qorsheyaal cusub oo ku saabsan ilaalinta nabadgelyada oo ay ka qaybqaadanayaan shacabku.

Wasaaraddaha Arrimaha Gudaha ee heer federal iyo heer maamul gobeeld iyo kuwa amniga iyo cadaalada ee labada heer federal iyo mid dowlad gobeeldba waxay soojedinayaan in labalaariyo talabaadan wax ku ool ka ah lana gaarsiiyo degmooyinka oo dhan si faa'iidada barnaamijka xasilinta looga dareemo dalkoo dhan.
Degmooyinka maamuladoodu cusub yihiin waxay u baahan yihiin boolis awood leh iyo garsoorkii oo dhinac taagan si ay uga miradhaliyaan dadadaalada ay ku xasilinayaan degmooyinkooda.

## Caqabadaha Jira

Daneeyayaasha arimaha xasilinta waxay isla qirsan yihiin inaan amni ku yimid qaab militeri xal u noqon karin colaadaha iyo is maan dhaafyada.

Sidaa daraadeed waa laga maarmaan in lahelo dadaalo ay horkacayaan bulshada rayidka ahi dhamaan meeelaha ay istaraatiijayada xasilintu ka hirgelayso si loo joogteeyo wadaxaajoodyada siyaasadda iyo amaniga la hantay. Caqabadaha la filan karo waxaa kamida:

- Helitaanka amni bulsho si kor loogu qaado kalsoonida iyo sharciyada awoodaha dowlada. Waxaa sidoo kale muhiima in hay'adaha UN, NGO yada iyo bulshada rayidka ahi ay tegi karaan deeganda la xasilinayo si barnaamijyada laga fulinaayo goobahaas ay horay ugu socdaan.

- Isku xirnaanshaha amniga iyo isusocod aan xadidnayni waxay awood u siinayaan hay'adaha dowlada inay hogaamiyaan dadaalada socda ayna sameeyaan hirgeliyaana siyaasadaha lagama maarmaanka u ah xasilinta.

Waxaa la diyaariyey hanaan ku saabsan amniga oo loosoo gaabiyo (CAS). Caqabadaha hada wajehaya barnaamijyo badan waxaa ugu weyn

sidii laysu waafajin lahaa sii balaarinta  barnaamijyadaas iyadoo si taxadar leh loo wajahayo arrimaha laxirrira amniga si loo xaqiijiyo inay barnaamijyadu noqdaan kuwa sii socda umaduna kawada faa'iidaysato. Hanaanka (CAS) wuxuu abuurayaa gole ka talabixiya arrimaha amniga suurtana geliya inay bulshada rayidka ahi ay si sahala uga qaybqaadan karaan barnaamijyadaas iyadoo aanay jirin caqabdo amni oo xanibaya dhaqdhaqaaqooda. Waxaa kaloo hanaankani sahlayaa suurtagalnimadii lagu heli lahaa qorshe midaysan oo u dhexeeya hay'adaha amniga iyo bulshada rayidka ah.

Waxaa kaloo lagama maarmaan ah in la isu dheelitiro maalgelinta arimaha amniga iyo gacansiinta wasaaradaha wadashaqaynta tooska ah laleh barnaamijakan ee heer federal iyo mid dowlad goboleed. Waxaa maalgelintaas ka mida in lasii balaariyo tayeynta dowlad goboleedyada/degmooyinka iydoo sidoo kale la dhiirigelinaayo ka qaybqaadashada jaaliyadaha iyo bulshada rayidka ah.

## 5. Qubaneyaasha

Iskudayada lagu doonaayo xoojinta nabada iyo dib-u-dhiska qaranka ee afarta arimood ee aan kor kusoo sheegnay oo loo dhan yahay lehna isla xisaabtan dhab ah, waxay ka turjmayaan balanqaadyadii, istaariijayadaha iyo siyaasadaha dowlada ee laxiriira dhalinyarada, arimaha haweenka iyo ka hortaga xag-jirnimada.

Tusaale ahaan arimaha la xiriira ka hortaga xag-jirnimada waxaa kamida in lala shaqeeyo hay'adaha dolwada ee ay khusayso iyo daneeyayaasha beesha caalamka si loo hubiyo in barnaamijka xasilintu uu ku xiran yahay istaraajiyadda dolwada ee ka hortaga xag-jirnimada iyo heshiiska amniga ee qaabdhismeedka hanaanka (CAS).

Marka laga hadlayo barnaamijayada iyo howlaha ku taxaluqa haweenka iyo dhalinyarada waxaa laraacayaa istraatiijiyada xasilinta ee ku aadan qaraarkii golaha amniga ee *Haweenka, Nabada iyo amniga* ee tirisigiisii ahaa 1325 (2000) iyo qaraarkii *Dhalinyarada, Nabada iyo Amniga* ee tirsigiisii ahaa 2250 (2015).

Istraatiijiyada xasilintu waxay dhiirigelinaysaa in dhaqaalaha xasilinta boqlkiiba 30 loo qoondeeyo in wax looga qabto arimaha haweenka.

## 6. Xiriirinta & Iskudubaridka

Xirriirinta guud ee istaartiijiayada xasilinta waxaa loo mari doonaa qabashada kulan bille ah oo ay isugu imaanayaan daneeyashaasha xasilinta waxaana hogaaminaya gole ay Wasaaradda Arimaha Gudaha ee federaalka iyo UNSOM CRESTA isla shir gudoominayaan.

Goluhu wuxuu gacan kageysanayaa sidii loo qaban lahaa kulmo lagu xoojinayo dadaalada ay istaraatiijiyadani diirada saarayso ee heererka kala duwan ee federaal iyo mid dolwad goboleedba iyadoo lala kaashanayo deeq bixiyayaasha, UN ka iyo bulshada rayidka ah.

Golahani wuxuu sidoo kale xiriirn doonaa qodobka sadexaad ee hanaanka CAS iyo Golaha xasilinta ee Sanduuqa horumarinta iyo dib-u-dhiska qaranka (SDRF).
Kulamada Golaha waxaa looga doodi doona loogana arinsan doonaa arimaha khuseeya dhicayada qaybta ka ah istraatiijiyadda xasilinta waxaana laysku xiri doonaa howlaha la qabanayo, siyaasadaha iyo istraatiijiyada xasilinta.

Iskuxirka howlwadeenada qorshaynata & fulinta iyo hanaanka CAS wuxuu suurta gelinayaahowlwadeeno diiradda saara sidii ay ugu xiriirin lahaayeen arimaha gaarka ah ee istaraajiiyadda kuwa guud. Goluhu wuxuu kaloo suurta gelinayaa islaxisaabtan dhab ah oo laxirria dedaallada xasilinta.

Wasaaradaha Arimaha Gudaha ee Dowlad goboleedyadu waxay yeelan doonaan gole xasilin oo si joogta ah u kulma kuwaasoo diirada saari doona hirgelinta iyo qorshaynta arimaha xasilinta ilaa heer degmo ee dolwad goboleedkooda. Wasaaradaha Arimaha Gudaha ee dowlad goboleedyadu waxay kaloo hubin doonaan sii jiritaanka xiriirka ay la leeyihiin Gudigga aminga Gobolka (RSA) si ay u caawiyaan hirgelinta Heshiiska amniga iyo hanaanka CAS ee heer dowladgoboleed.

Waxaa intaas dheer Wasaaradda Arimaha Gudaha ee heer federal iyo Wasaaradaha arimaha gudaha ee heer dowlad goboleed waxay yeelan doonaan wadatashi joogta ah si gacan looga siiyo dolwad gobeeldyada hirgelinta kulamada aan kor kusoo sheegnay. Kulamdaas waxaa lagu qaban doonaa Muqdisho iyo caasimadaha dowlad goboleedyada si meerto ah.

Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee heer federal iyo Wasaaradaha arrimaha gudaha ee heer dowlad goboleed waxay adeegsan doonaan hagayaal si ay u caawiyaan dhismaha Gudiga qiimaynta, nabada iyo xasilinta degmada. Hagayaashaas oo ay sameeyeen USAID TIS+ iyo UNJLPG waxay horseedayaan in lahelo habraac laysku waafaqsan yahay oo ku saabsan dib usoo kabashada bulshada. Waxay kaloo sahleysaa in lala falgalo dhinacyada kale ee qaybta ka ah xasilinta heer degaan-hoosaad si ay u hagaan una qaabeeyaan hirgelinta mashaariicdan xasilinta.

## 7. Kormeer iyo Qiimayn

Baahida loo qabo isku xirka istaartiijiyadda xasilintu waa in istaartiiyadda lagu sameeyo kormeer iyo qiimayn si loo helo waxqabad muuqda oo cadaytasiina leh kaasoo lagu hantay go'aan midaysan.

Muhiimada laga leeyahay hagayaasha kormeerka iyo qiimaynta ee ku daaban istaraatiijayadu waa in lahelo Isfahan buuxa oo u dhexeeya daneeyeyaasha heer qaran iyo kuwa heer caalami. Wasaarada Arimaha Gudaha ee heer federal oo gacan ka helysa UNSOM CRESTA/A waxay adeegsan doontaa laba hagayaal si ay u caawiso kormeerka iyo qiimaynta guud ee istraatiijiyada waxayna kala yihiin: (i) Hanaanka xogta ee Howlgalka midaysan ee loosoo gaabiyo (MCOP), (ii) Astaamaha iskufilaanshaha & nuglaanshaha buuxa oo isna loosoo gaabiyo (FIMM).

MCOP waa hage-nidaamiye lagu maareeyo xogta laga soo uriyey hay'adaha dowlada, deeqbixiyayaasha, Hay'adaha qaramada midoobey iyo urarada aan dowliga ahayn ee bahwadaagta la ah howlaha la xirrira istaraatiijiyadda xasilinta. Xogta lasoo uririyo waxaa lagu soo bandhigaa kulanka Golayaasha xiriirinta arrimha xasilinta sida kan billaha ah ee Wasaarada Arimaha Gudaha ee heer Federaal iyo kuwa bahwadeegteeda ah ee heer dowlad Goboleed iyagoo wadashaqayn la yeelanaya Wasaaradaha Qorshaynta iyo Unuga Iskuxirka Deeqaha.

Halka FIMM uu bixin doono diiwaan-qoraal tafatiran iyo qiimayni lasocoto si fahan buuxa looga helo hanaan socodka la xirrira istraatiijiyada xasilinta ee dowlada kaasoo u sahalaya daneeyayaasha istaraatiijiyada inay helaan cadaymo lagu ogaan karo guulaha laga gaarey xaaladaha ku xeeran amaniga, ismaamulka iyo arimaha dhaqan dhaqaalaha bulshada ee heer degmo. Tani waxa ay sahli doontaa in la guuleysto iyadoo la raacayo tusmeeyayaal muujinaya qaybkasta

horumarka ay samaynayso sida hay'adaha dowlada ee hirgelinta adeega garsoorka iyo amniga. Labadaan hage-nidaamiye waxay gacan kageysan doonaan dooda lagu xoojinayo xiriirinta iyo qaabdhismeedka iskuxirka barnaamijyada guud ahaan gaar ahaana dadaalada xasilinta. Waxa kaloo lagu samayn doonaa hage-nidaamiyaashan horumarin joogta ah iyo dib-ueegis si wax loo ga bedelo hirgelintooda.

Waxaa kaloo dib-u-eegis lagu samayn doonaa sidii laysu waafajin lahaa hage-nidaamiyaha kormeerka iyo qiimaynta ee hanaanka wadajir oo Wasaaradu samaysey si loo helo xog-ururin iyo warbixino dhamaystiran.

Inkastoo hage-nidamiyeeshani ay noqon doonaan kuwa rasmiga ah ee la isticmaalayo hadana waxaa jiri doonaa qaab ay Wasaarada iyo UNSOM CRESTA/A u maarayndoonaan habdhaqanka bulshada qaybta ka ah istraatiijiyada xasilinta.

Waxaa kaloo lays weydaarsan doonaa casharadii laga bartay arimaha xasilinta iyo baahinta awoodaha dolwada ee laga soo minguuriyey meelo ka baxsan Soomaaliya. Waxaa kaloo jiri doona qiimayn ay samayndoonaan barnaamijyada gaarka ahi si looxoojiyo istaraatiijiyada xasilinta.

## 8. Istaraatiijiyada Isgaarsiinta

Si looga mirodhaliyo istraatiijiyada xasilinta dalka iyo qorshayaasha fulineed ee dowlad goboleedyada iyo Gobolka Banaadir ee ku lifaaqan, waxaa muhiim ah in la helo istraatiijiyad isgaarsiin oo mug iyo macno leh. Waxaa mudnaanta koowaad la siinayaa marka lagahadlayo dadaalada isgaarsiinta in la adkeeyo kaalinta dowladnimadda heerarkeeda kala duwan iyo ku soo dabaalida amni iyo kaladanbeyn bulshada kunool deegaanada aysan dowladnimada wali sidii la rabay uga hanaqaadin. Waxaa kale oo hubaal ah in kooxda argagaxisada Al-shabaab ay carqaladeynayso barnaamijyada xasilinta ayagoo adeegsanaya weeraro gacan ka hadal ah iyo dacaayado dhanka warbaahinta ah. Kooxda argagaxisada ee Al-shabaab waxay isku muujisaa in ay cadaalad fasho ayagoo oo marin habaabinaya bulshada ku nool deeganada ay saameynta ku leeyihiin, balse waxa ay isticmaalaan caburin, handadaad iyo cagajugleyn joogta ah. Sidaa darteed, istraatiijiyada isgaarsiintu waxay diirada saareysaa labo ahmiyadood oo kala ah:

I. Cadeynta iyo kor uqaadida kaalinta dowladda iyo fahanka waxqabadka ay wado, gaar ahaan arrimaha barnaamijyada xasilinta iyo guulaha horumarineed, sida koruqaadida dowlad-wanaaga, heshiisiinta bulshada, dib u soo kabashada iyo sareynta sharciga iyo kala danbeynta,

II. Ka-hortaga dacaayadaha Al Shabaab kuwaas oo ku salaysan majaxaabinta dadaalada dowladda ee hirgalinta istraatiijiyada barnaamijka xasilinta iyo gaarsiinta dadka shacabka addeegyada assaasiga ah oo ay u hamuun qabaan si ay u helaan nabad waarta.

Waxaa xusid mudan in dadaalka kaliya ee haatan jira dhanka siyaasada isgaarsiinta uu ku kooban yahay barnaamijyada ka baxa Raadiyaha la yiraahdo Wadajir, kaas oo taageera istraatiijiyada xasilinta dalka iyo qorshayaasha fulineed ee dowlad-goboleedyada. Waxaa iska kaashada Wasaarada Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta iyo Wasaarada Warfaafinta iyo hay'adaha daneeya arrimaha xasilinta. Raadiyaha Wadajir waxaa ka baxa barnaamijyo asbuucle ah oo lagu wacyi galinayo bulshada ku nool deegaanada ay hawlaha xasilintu ka socdaan. Barnaamijyada Wadajir waxay xoogga saaraan dowlad-wanaaga, dib- u-heshiisiinta, taabagalinta hanaanka dowladaha hoose iyo bixinta addeegyada assaasiga ah oo bulshadu u baahan tahay.

Sikastaba ha ahaatee, Wasaarada Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta ayada oo la kaashanaysa hay'adaha kale ee dowladda, gaar ahaan, Wasaaradda Warfaafinta iyo Xafiiska Raysul Wasaaraha barnaamijka Ka hortaga xagjirnimada- (P/CVE), waxa ay aaminsan tahay in loo baahan yahay in la ballaariyo istraatiijiyada Isgaarsiinta lana curiyo minbaro baraha bulshada si dadweynaha loo gaarsiiyo fariimaha waxqabadka mashaariicda xasilinta sida ugu fudud oo uguna dhaqsaha badan. Si arrintan looga mira-dhaliyo, Wasaaraddu waxay si dhaw ula shaqaynaysaa barnaamijka Kahortaga Xagjirnimada ee Xafiiska Ra'isul-wasaaraha iyo barnaamijyada kale oo ay wado Wasaaradda Warfaafinta.

## 9. Dhaqaalaha (Resources)

Wixii ka horeeyey 2015kii waxaa unuga xasilinta ee Boqortooyada midowdey (UK) iyo midowga yurub (EU) ay taageera dhaqaale ku bixinayeen lataliyayaasha gacanta ka geysanayey horumarinta istraatiijiyada xasilinta iyo xiriirnta dowlada federaalka ah.

Laakiin ilaa iyo 2015-kii nidaamka xiriirinta ee istraatiijiyada xasilinta ee heer federal ilaa heer degmo waxaa taageeraysey Wasaarda Arimaha Gudaha Federaalka oo gacan dhaqaale ka helysa barnaamijaka xasilinta ee loosoo gaabiyo (S2S) kasoo dhaqaale dhan 4 milyan doolar ka helay xafiiska taageerida dhismaha nabada ee qaramnada midoobey ee loosoo gaabiyo UN (PBSO).

Dhaqaalaha ay Wasaaraddu ku taageerto degmooyinka waxaa loo adeegsadaa dib-uheshiiisiinta & wadaxaajoodyada bulshada iyo caawimaad dhaaqaale oo lasiiyo maamulada ku meelgarka ah. Hay'adda USAID TIS+ waxay dhaqaale ku taageertay lataliyaasha ka howlagala Wasaaradaha Arimaha Gudaha ee Jubaland iyo koonfur Glabeed iyo lataliyeyaasha hanaanka Wadajir ee Wasaaradda. UK ERI waxay iyaduna gacan dhaqaale ka geysatay samaynta hage-nidaamiyayaasha kormeerka & qiimaynata iyo samaynata qorsheyaasha dowlad goboleedyada.

Si dhaqaale wax ku oola loogu helo istraatiijayada xasilinta 2017-2020 waxaa lasoo jeediyey in la mideeyo taageerada dhaqaale ee ay beesha caalamku hada siiso dowladda federaalka ah iyo tan ladamcasan yahay in lagu taageero dowlad goboleedyada aan hada helin taagero dhaqaale oo la xiriirta arimaha xasilinta.

Marka si gaara diiradda loo saaro teegarada dhaqaale ee barnaamijka (S2S) oo markii hore loo qoondeeyey 2 milyan doolar; hada waxaa la qiyaasayaa inay noqoto 2.5 milyan doolar si loo xoojiyo iskuxirka, qiimaynta iyo baahinta hawlaha ee heer federaal iyo heer dowladgoboleed oo ay ku jiraan degmooyinka. Miisaaniyadu waxay ka jawaabaysaa baahida loo qabo in kor loo qaado tayada hay'adaha federaalka, dolwad-goboleedyada iyo kuwa degmooyinka si loo gaaro hadafka la higsanayo ee ku qeexan heshiiskii amniga iyo hanaanka (CAS)

Ka hor kulanka bahwadaagta CAS ee bisha December ee 2017-ka, Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee heer Federaal oo kaashanaysa Wasaaradaha Arrimaha gudaha dowladgoboleedyada waxay u soo gudbin doontaa beesha caalamka baahi dhaqaale oo faahfaahsan oo ay si cad uga muuqato kormeerka iyo qiimaynta.